

Muunada Bayaanka Saamaynta Saamiga ee Codsiyada iyo Soo-jeedinta Gudiga Dugsiga

Cinwaa

nka: Furitaanka Cusboonaysiinta

Taariikhda:

Janaayo 13, 2021

Miyaa **QALABKA QORSHEYNTA SINADA BPS** la isticmaalay? (Haa ama Maya):

Haa

| Qaybaha Qalabka Qorshaynta Saamiga Jinsiga BPS | Soo Koobid / Sabab |
|---|---|
| <p>1. Soo jeedin / Soo bandhigid & Saamaynta <i>Waa maxay natiijooyinka iyo saameynta codsiyada/soo-jeedinta la rabo? Ayaa hogaamiyay hawshan, miyayna ka tarjumayaan kaladuwanaanta ardayda / qoysaska BPS?</i></p> | <p>Bandhigani wuxuu bixin doonaa cusbooneysiin ku saabsan horumarka degmada ee ilaa maanta dib u furida shaqada oo ay ka mid yihiin: dadaalada socda ee ah in si nabadgelyo leh dib loogu furo iskuullada ardayda iyo shaqaalaha, taageerada joogtada ah ee kaqeybgalka ardayda iyo wacyigalinta qoyska, iyo cusbooneysiinta shuruudaha waqtiga waxbarashada ardayga.</p> |
| <p>2. La jaanqaadida Qorshaha Istiraatiijiyadeed <i>Sidee soo jeedinta / bandhigu ula jaanqaadayaan qorshaha istiraatiijiyadeed ee degmada?</i></p> | <p>Shaqadeena ah inaan dib u furno iskuulada si nabdoon ayey ula jaan qaadayaan balanqaadyadan qorshe istiraatiijiyadeed:</p> <ul style="list-style-type: none"> - Kordhi Dhamaan Codadka - In la ciribtiro Fursadaha iyo Guuldarooyinka - Dardargelinta Waxbarashada |
| <p>3. Falanqaynta Xogta <i>Xog intee le'eg ayaad u adeegsatay inaad ku falanqeyso arrinta / mowduuca? Miyaa lagu kala saaray jinsi? Maxay muujisay marka loo eego kala duwanaanshaha dadka taariikhda la haybsooco ah?</i></p> | <p>Fursadaha dib-u-furista waxaa loo tixgeliyey iyadoo la adeegsanayo xog loo kala saaray isir iyo xaalad dhaqan-dhaqaale. Go'aankeenu wuxuu tixgelinayaa mudnaanta la siinayaa ardayda naafada ah, kuwa barta Ingiriiska iyo ardayda leh waxbarashada tooska ah ee xaddidan ama carqaladeysan (SLIFE), ardayda midabka ah, ardayda la kulma hoy la'aanta, iyo ardayda ay si isku mid ah u aqoonsadeen kooxaha taageera ardayda (SSTs) iyo qoysaska inay u baahan yihiin qofka baranaya. Macluumaadka la xiriira barashada fog, oo ay ku jiraan xaadiritaanka iyo waxqabadka khadka tooska ah, ayaa laga heli karaa dhowr dashboodyo loogu talagalay iskuulada iyo hoggaanka degmada, oo la cusbooneysiyo toddobaadle. Wixii cusbooneysiin gaar ah ee ku jira soo bandhigiddan, xogta loogu talagalay qaybinta Chromebook, foorjarka internetka loo qaybiyo, iyo buundooyinka No Credit ayaa loo kala saaraa jinsi.</p> |
| <p>4. Kaqeybgalka Daneeyayaasha <i>Yaa ku hawlanaa (tirada, dadka, iyo doorarka), sidee iyo maxay ku dhalatay? Maxay ardayda / qoysaska saamaynta ugu badan ku yeesheen codsiga/ soo bandhigistu tidhi?</i></p> | <p>Shaqaalaha xafiiska dhexe, oo ay kujiraan wakiilo ka socda xafiiska waxbarashada khaaska ah, xafiiska xogta iyo isla xisaabtanka, iyo qeybta sinaanta, istiraatiijiyadda & fursadaha ayaa taageeray howl-wadeenada HIPP kulamadii toddobaadlaha ahaa ee bilawday Nofeembar 2. 28-Xubnood ee Task Force waxaa ka mid ah waalidiinta, ardayda, wakiilada BTU, iyo hogaamiyaasha iskuulka, waxaana si wada jir ah u hogaamiya xubin ka tirsan Xafiiska Dhexe iyo xubin ka tirsan shaqaalaha BTU. Intaa waxaa sii dheer, dib-u-furitaanka Task Force oo shaqeynayay intii lagu jiray Ogosto iyo Sebtember 2020, degmada iyo wada-shaqeynta BTU oo ka kooban 9 guddi-hoosaadyo si loo furo dib-u-furista. Tan iyo markaas, Task Force waxay u xuubiibteen inay taageeraan xalinta dhibaatooyinka laxidhiidha hirgalinta jadwalka hal abuurka ah ee waxbarida qofka.</p> |

| | |
|---|---|
| <p>5. Xeeladaha Saamiga Jinsiyada <i>Sidee soo-jeedintan / bandhiggu u yareeyaa kala-duwanaanta una kordhiyaa sinnaanta, gaar ahaan sinnaanta sinjiga? Waa maxay cawaaqibta aan la filayn? Istaraatiijiyad dheeri ah ayaa sii horumarin doonta saamiga?</i></p> | <p>Barashada shaqsi ahaaneed ee hadda jirta waxay mudnaanta siineysaa qayb ka mid ah ardayda (HIPP) ee aan aaminsanahay inay saamaynta ugu xun ku leeyihiin barashada fog. Tani waxay ka tagaysaa in ka badan 50,000 oo arday inay guryahooda wax ku bartaan, markaa muhiimad weyn ayey leedahay inaan sii wadno hagaajinta wixtarka barashada fog. Guga, rajooyinka barashada fog waxaa la hirgaliyay laga bilaabo 4 ta Maajo, oo ay kujireen tilmaamo qaabeynta waxbarashada. Inta lagu jiro wakhtigan, ardaygu celcelis ahaan 83% iyo waxqabadka maalinlaha ah ee ardayga celcelis ahaan 51%. Khibradaha waa kala duwanaayeen, halka sahanada ardayda ay muujinayeen ardayda inay dareemeen inay taageerayaan iskuulada, kaliya 33% ardayda ayaa muujiyay inay ku faraxsan yihiin inay kaqeyb galaan fasalka fog. Sidoo kale, keliya 19% macallimiintu waxay soo sheegeen inay dareemayaan kalsooni ay ku taageeri karaan ardaydooda u baahan taageerada tacliinta ugu badan. Xogtaan iyo kuwa kale waxay u horseedeen BPS inay hirgeliyaan horumarin kala duwan, oo ay ka mid tahay soo iibinta nidaam maarayn waxbarasho gaar ahaan fasalada yaryar oo ay kujirto hab qoysaska ay ula falgalaan, si cad ula xiriirida borotokoollada imaatinka iyo sida loo kala saaro kaqeybgalka fog iyo qofka, bilowga Guusha Ardayda Panorama si looga caawiyo macallimiinta inay horumariyaan oo ay kormeeraan qorshooyinka guusha ardayda, iyo u fidinta kobcinta xirfadeed macallimiinta iyo shaqaalaha kale ee dugsiga si ay ugu guuleystaan dhaqamada barashada fog. Dadaallada horumarinta xirfadeed waxaa ka mid ahaa furitaanka bulshooyinka barashada xirfadaha (PLCs) ee macallinku hogaaminayo ee telescope a deyrtaan ayaa diiradda lagu saaray tayada fog iyo kuwa isku dhafan ee tayada leh.</p> |
| <p>6 Miisaaniyadda & Hirgelinta <i>Waa maxay saameynaha miisaaniyadu? Sidee fulintu u xaqiijin doontaa ujeedooyinka sinnaanta? Ma jiraan hoggaan iyo shaqaale Madoow, Latinx ah oo keena muraayad sinnaanta sinjiga?</i></p> | <p>Si loo furo qaybinta hadda ee ardayda oo ahmiyad sare leh (HIPP), degmadu waxay dooratay inay hirgeliso tallaabooyin caafimaad iyo badbaado oo dheeri ah, oo ay ka mid tahay iibsiga 9,500 hawo sifaynaya, oo bixisa toddobaadle tijaabinta Covid-19 ee shaqaalaha iyo ardeyda fasalada 9-12, bixinta darajada caafimaadka ee 'PPE', jadwal u sameynta tayada hawada dheeriga ah iyo imtixaanka, bixinta gaadiidka ardayda, iyo hubinta adeegga cuntada ee goobta hadday suurtagal tahay. Tallaabooyinkan fulintu dhammaantood waxay keeneen saameyn miisaaniyadeed oo la taaban karo. Kooxda HIPP Task Force waxay sii wadi doontaa inay kormeerto saamaynta sinnaanta ee waxbarista fog, waxbarashada shaqsiga ee hadda jirta, iyo ballaarin kasta oo suuragal ah ee barashada qofka. La-hawlgalayaasha fududeeyayaasha ee HIPP Task Force labaduba waa hogaamiyayaal midab leh, sidoo kale hogaamiyayaal badan oo iskuula iyo hogaamiyayaal degmo ayaa iska kaashanaya qorshaynta furitaanka socda. Hogaamiyayaashani waxay ka faa'iideystaan habka REPT waxayna keeneen muraayad sinnaan midab leh.</p> |
| <p>7. La Xisaabtanka & Isgaarsiinta <i>La Xisaabtanka & Isgaarsiinta Sidee saamayn loogu samayn doonaa qiimeynta, diiwaangelinta iyo la socodsiiinta daneeyayaasha? Ayaa masuul ka noqon doona tan?</i></p> | <p>HIPP Task Force waxay la xisaabtamaysaa dadaalladaan iyadoo ay weheliso hoggaanka degmada ee ballaaran. Kooxda HIPP Task Force waxay sii wadi doontaa la kulanka usbuuc walba ilaa arday kasta oo mudnaanta la siinayo barashada shaqsi ahaaneed uu ku soo laabto dugsiga. Qeybta xogta oo ay ku jiraan xaadiriska ardeyga iyo ka qeybqaadashada xogta waxa lagu daabacay wabsaaydka BPS ee soo sheegista dadweynaha iyo isla xisaabtanka, iyadoo xogta kala saareen kooxo ardeya.</p> |